

Sharciga 1^{da} Agoosto 1959, lamba. 4 diw.

Wax-ka-beddellada qodobka 58, ee sharciga 12 Disember 1958, lamba. 12, ee diw.

Doorashooyinka siyaasadeed.

MAAMULAHA

Markuu arkay ansixinta (oggolaanshaha) Golaha Xeerdejinta;

WUXUU GUDDOONINAYAA SOONA SAARAYAA

Sharciga soo socda:

QODOB KALIYA

Qodobka 58, ee Sharciga 12 Disember 1958, lamba. 12 “Doorashooyin siyaasadeed”, waxaa lagu kordhinayaa faqrada (xubnaha) soo socda:

“Go’aannada ansixinta iyo diiddada ansixinta waa in ay noqdaan kuwo lagu dhawaaqo degaan doorasho, ee kasta.

“Go’aannada diiddada ansixinta waxa ay noqon karaa qayb ahaan ama gebi ahaan, xiriirka xagga dabeecadda, qaddarka iyo xaddiga khaldanaanta lagu arko: xaaladda kowaad, Garsooruhu, kaddib makii uu góaannada qayb ahaanta ah, ee diiddada ansixinta, waxa uu wax ka beddelayaa lambarrada (tirada) doorashooyinka iyo natiijooyinka dabayaaqada ah (dhammaadka), xaaladda labaad, waxa uu ku dhaqaaqayaa diiddada ansixinta gebi ahaata ah, ee doorashooyinka lagu qabtay degaan-doorashada.

“Haddii ay dhacdo diiddo ansixin oo geli ahaaneed, waa in lagu dhaqaaqo, hal sanad gudahiiis, laga bilaabo taariikhda góaanka Garsooraha, doorashooyin cusub”.

Sharcigan waxaa la gelinayaa Ururinta Rasmiga ah, ee sharciyada, waxaana lagu nashrinayaa Faafinta Rasmiga. Qof kasta, oo ku gudboon, waxa khasab ku ah in uu dhowro kuna khasbo in loo dhowro sida sharci Soomaaliya leedahay.

Muqdisho 1^{da} Agoosto 1959.

Maamulaha
Mario Di Stefano

Wasiirka Kowaad

Cabdullahi Ciise Maxamuud

Wasiirka Arrimaha Gudaha

Xaaji Muuse Boqor